



Infeekshanka sababa Fayruska-RS

Warbixin ku saabsan Fayruska-RS iyo sida aad hoos ugu dhigi karto in ilmahaaga u infeekshan culus ku dhaco

abbvie

Waa maxay RS-fayrus?

Talo-bixin ku saabsan fayruska. Fayruskani waa fayruska ugu caadiyeysan ee mariinada neefsashada ku dhaca, wuxuuna ku faafa hab fudud. Markii ilmaha ay laba sannadood buuxsadaan, ayuu guud ahaan Infeekshanka sababa fayruska-RS ku dhaca. Ilmaha badidooda hargab ahaan ayuu ugu dhaca. Laakiinse, mararka qaarkood wuxuu Fayruska-RS sababa xaalad taasi ka culus oo sambabaha waxyeesha.

Fayruska RS, waa laba ereyo oo la soo gaabiyay [Respiratoriskt syncytialvirus], waa nooc weerar ku qaada noocyo unugyo gaar ah oo ku nool mariinada neefsashada. Taasoo sababayso in unugyada fasasyada/hurgunada ku dhacay, ay isku dhalaalaan oo kaddib isku rogaan waxa loo yaqaanno [syncytier]. Waxayna iyaguna sababayaan in xub-axaleedyada mariinada neefsashada ay soo bararaan. Taasoo iyadana badisa soosaarida xaakada. Haddii ay dhacdo infekshanka mariinada neefsashada hoose, waxay bararka iyo xaakada adag sababayaan in ilamaha u si fiican u neefsan karin.

Fayruska-RS wuxuu sannad kasta ka dilaaca adduunka oo idil. Dalka Iswiidan wuxuu Fayruska-RS siiba ku faafa xilliyada qaboowaha. Xilliga wuxuu bilaaban kara bisha oktoobar wuxuuna socon karaa ilaa xilliga gu'ga. Xoogga iyo dhirirka xilliga Fayruska-RS kolba waa si sannad kasta iyo hadba sida degmooyinka dalka ay u kala duwan yihiin.



Dalka Iswiidan wuxuu Fayruska-RS siiba ku faafa bilaha qaboowaha.



Fayruska-RS wuxuu siiba
faafa markii qof fayooow iyo
qof buka ay is taabtaan.



Sidee buu fayruska-RS ku faafa?

Fayruska-RS hab fudud ayaa lays qaadsiin kara. Wuxuu siiba faafa markii qof fayooow iyo qof buka is taabtaan, sida tusaale gacan is-qabasho ama lays dhunkado.

Fayruska-RS wuxuu meelaha qaarkood, sida miis, buugag ama gacanta albaabada ku noolaan karaa ilaa lex saacadood. Mudada u marada iyo maqaarka ku noolan karo way ka gaaban tahay. Habka aan toosnayn oo ilmaha infeekshanka la qaadsiin karo waa iyadoo u ilmo xannuunsan ka amaahdo qalabyada lagu ciyaaro. Fayruska wuxuu faafa haddii uu fursad u helo, in uu galo xub-axaleedyada indhaha, sanko ama afka. Fursadaas wuxuu hel kara haddii, qofku u isagoo gacmahiisa fayruska ku sido uu rugo indhahiisa, farahiisa sanko ama afka geliyo.

Inkastoo la aaminsan yahay in cudurkeeneyaasha hawada, aysan lahayn halista is-qaadsiinta sidaas u wayn ayuu haddana Fayruska-RS ku faafa, isagoo ka kooban daruur dareere ah, markii bukaha qofka u dhow u qufaco ama hindhiso.

Ubadkayga halis miyuu ugu jira in fasas/hurgun la qaadsiyo?

Qof kasta, carruur iyo dadka waayn ba waxay halis ugu jiraan in fasas/hurgun u ku dhaco. Tiro ka badan boqolkiiba qonton ee carruurta weli aan hal sano buuxsan waxaa ku dhaca fasas/hurgun. Carruurta laba sano buuxsaday badidooda hal ama dhawr jeer ayuu Fayruska-RS ku dhaca. Muddadaas kaddib wuxuu difaaca jirkooda awooda in uu Fayruska-RS ka badbaadiyo ama hoos u dhigo dhibaataadiisa.

Fayruska-RS wuxuu mararka qaarkood leeyahay calaamado culculus. Tiro lagu qiyaasay hal ilaa saddex ee ilmaha dhallanka ah, ayaa daryeel iyo dartiisa isbital loo dhiga.



Haddii qof carruur ah oo aan weli lex bilood buuxsan u hargab ku dhaco, kaasoo calamadahiisa ah qufac culus iyo cilladda awooda neefsashada, ama guud ahaan ka muuqato caafimaaddarro iyo fuuqbixid, waa in loola xiriira xarunta daryeel-caafimaadeedka degdegga ee ugu dhow.

Haddii ilmaha ay inyar waawayn yihiin, waxaa xaalad-qiimayn darteeda loola xiriiri kara rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, rugta daryeel-caafimaadeedka ama heeganka daryeel-caafimaadeedka.

Calaamadaha Infeekshanka sababa Fayruska-RS waa sidee?

Infeekshanka sababa Fayruska-RS wuxuu caadi ahaan ku soo ifbaxa sida hargab fudud, oo leh hindhiso iyo qufac badi ahaan leh xaako adag. Cunugga wuxuu muujinayaa daal aan caadi ahayn iyo rabitaankii cuntada oo hoos u dhaca. Laakiinse daruuri ma aha in qandho ay ku dhacdo. Xaaladaha badidooda dhibaato la'aan ayuu ka bogsada.

Waxaa dhici karto in carruurta dhallanka ah oo sidooda ba caafimaad qaba, ay bilooyinka nooloshooda ugu horeeyso ay hargab ka sokoow, ku dhaco qaarjeex sababa cillada awooda neefsashada. Xaaladaas waa in isbitaal lagu daryeela. Haddii usan awoodin in uu cunteeyo waxaa lagu daryeela oksijin, waxaana cuntada lagu siiyoa tuubo.

Calaamadaha aad u culus ee Infeekshanka sababa Fayruska-RS waxaa kamid ah:

- Cunugga hab aad culus ayaa u neefsanayaa
- Cunugga hab dhaqsi badan ayuu u neefsanayaa oo leh shanqar xurto ama xiiq leh
- Awoodda cuntaynta iyo cabbintaanka oo hoos u dhacda
- Ahmiyad siinayn agagaarkiisa, caajis
- Qufac xadidan
- Xaako aad u adag sanko iyo mariinada neefsashada
- Qandho aad u kulul

Carruurta aad u yaryar, siiba kuwa dhicisnimmo ku dhashay, oo muujiya calaamadaha hargabka iyo guud ahaan caafimaaddarro leh qaabka xibingal (joogsiga neefsashada), xaaladaas oo u baahan daryeel-caafimaadeedka isbitaalka ee degdegga.

Kooxaha ilmaha qaarkood way ka nugul yihiin kuwa kale

Dahallanka aad u yaryar ka sokoow, siiba kuwa dhicisnimo lagu dhallay, carruurta qaba cudurrada wadnaha iyo sambabaha, carruurta qaba cudurka [Downs syndrom] ama qaba cudurrada ku dhaca dareenwadeyaasha murqaha, kuwaasoo halis ugu jira in uu ku dhaco cudur halis oo raage ah.

Fayruska-RS ma sababa dhaawac joogto ah?

Ilmaha yaryar oo berri hore ku dhacay Infeekshanka sababa Fayruska-RS oo culus, waxay dhawr sannadood la kulmi karaan cillada neefsashada markii u hargab ku dhaco.

Waa arrin muhim ah in dhallanka iyo carruurta yaryar, laga badbaadiyo fasas/hurgun, siiba lexda bilood ee nooloshooda ugu horeeyso.

Kooxaha ilmaha ee u nugul leh in uu cudurka ku dhaco, waa in cudurka laga badbaadiya siiba sannadka nooloshooda ee ugu horeeyso.





Kooxaha ilmaha
ee u nugul leh in uu
cudurka ku dhaco,
waa in si kasta ba
cudurka fasas/hurgun
laga badbaadiya.



Suuragal ma noqon karto in gebi ahaan laga badbaado Fayruska-RS , laakiinse hoos ayaa halista fahas/hurgun loo dhigi kara. Ku dadaal sidii aad u badbaadin lahayd kuwa aad ugu nugul leh in ku dhaco, taasoo suuragelin doonto in aysan ku dhicin markii ay aad u yaryar yihiin.

Markii xilliga Fayruska-RS u bilaawdo sidee ayaan ilmahayga ugu badbaadin kara fasas/hurgun?

- Habka ugu wanaagsan ee faafinta looga hortago xilliga hargabyada, waa iyadoo si fiican gacmaha laysaga dhaqo biyo iyo saabbuun. Ku isticmaal daawada gacmaha ee jermiga ciribtirta.
- Kuwa walaalahiisa oo dugsiga xannaanadda lagu xannaanadeeyo bar in gacmaha ay si fiican isaga dhaqaan.
- Ka taxadar taabasahada carruurta iyo dadka waayn ee u hargabka ku dhacay, sida tusaale dhunkasho markii ay hargabsan yihiin.
- Naas-nuuji haddii aad kari karto ama caanaha dhalo ku sii.
- Waa in cunugga laga ilaaliyo meelaha sigaarka lagu cabbo.
- Haddii qaraabo ama saaxiibo ay ku soo booqdaan, u sheeg inaysan taaban kuwa hargabsan. Waxaa ka sii fiican in booqashooyinka dib loo dhigo ilaa ay ka bogsadaan.
- Ku qufac ama ku hindis kilkilshaada.
- Hab joogto ah u tirtir/nadiifi foolmayrta, miiska iyo qalabyada carruurta ku ciyaaraan.
- Goobjoog ka noqo markii waalidiinta iyo kooxaha carruurta ay goob dibada ku taalo ku kulmayaan. Ka taxadir dhaqdhaqaaqa goobaha gudaha ku yaalaan, sida dugsiyada xannaanadda albaabada u furan, oo ah goob carruur yaryar oo tiro badan ku kulmaan, oo kaddib ku cayaarayaan isla qalabyada lagu ciyaaro.
- Fiirogaar sii haddii ilamaha aad u kaxayso goob ay ku sugan yihiin dad tiro badan. Halista fasas/hurgun Fayruska-RS ee hawada ku faafa sida uma wayna. Waxaa ka halis wayn haddii ilamahaaga agtiisa lagu qufaco ama hindhiso. Nadaafadda-darrada gacmaha ayaa kamid ah halista maadama qofka hargabsan uu cudurkeenaha qaadiin karo gacanta gaariyaasha lagu soo adeegto, halka la qabsado markii la saaran yahay gaadiidka dadwaynaha iwm.

Ma jirta daawo lagu daaweeyo Fayruska-RS?

Weli lama soo saarin tallaal loogu hortago Fayruska-RS. Laakiin baaritaanno badan oo arrintaas ku saabsan ayaa socdaan, taasoo ujeedada tahay in la soo saaro tallaal kahortagta cudurka.

Daawaynta kahortegida Infeekshanka sababa Fayruska-RS ku salaysan, waa iyaddo toos loogu shuba unugyada difaaca jirka ee loo yaqaanno (difaaca jirka oo hebedka ah). Taasoo loogu talagalay koox-carruureed aan tiro badnayn, oo haddii u Infeekshanka sababa Fayruska-RS ku dhaca la kulmi karaa dhibaatooyin culsulus. Takhtarka cunugga ayaa qiimaynta iyo go'aanka daryeelida noocan ah gaari karo.



Dhibaataada ubadkayga sidee ban wax ugu qaban kara?

Ma jirto daawo lagu daaweeyo Infeekshanka sababa Fayruska-RS oo socda. Daawada antibiotics waxba kama tarto. Laakiinse taallaabooyin badan ayaa ka qaadi karta sidii aad hoos ugu dhigi lahayd calaamadaha cudurka ee u ubadkaa la dhiban yahay.

- Ku dadaal inaad cabbitaan badan siiso, taasoo kahortagayso fuuqbax oona fududaynayso ka soo go'a xaakada adag.
- Dhibcaha sanko ee bararka ka yareeyaha ah ee lagu isticmaalo hadba dardaaranka waxay fududeeyaan awooda neefsashada.
- Ilmaha yar oo aan awoodin isku duufayn, waxaa hab taxadarsan la isticmaali kara dhuuqaha sanko, kaasoo laga soo iibsano karo farmashiyada.
- Naas-nuuji haddii aad kari karto ama caanaha dhalo ku sii.
- Sida bararka xub-axaleedka hoos loogu dhigo awgeed kor u qaad dhinaca dambe ee wiifowga ama sariirta. Ama fadhisi haddii u kari karo.
- Qolka u ku sugan yahay ka dhig qabow.
- Haddii qandho ay hayso sii daawooyinka qandhada dejisa ee ruqsad la'aan farmashiyada laga soo iibsano karo. Sii qiyaasta baakada ku qoran.



Fiirogaar-sii calaamadaha fuuqbaxa ama cillada awooda neefsashada.

Warbixin dheeraad ku saabsan Fayruska-RS ka aqriso

Haddii aad doonayso in aad aqoonta Fayruska-RS korarsato booq bogga internetka rsvirus.se. Naseexo ku saabsan sidii hoos loogu dhigi lahaa halista fasas/hurgun sii qaraabadaada iyo saaxiibadaada.

rsvirus.se





Infeekshanka sababa Fayruska-RS wuxuu mararka qaarkood ka darran yahay hargabka

Buugani yar waxaad ka aqrisan karta warbixin ku saabsan Fayruska-RS (Respiratoriskt syncytialvirus) iyo fasas/hurgun, calaamadaha infeekshan iyo sida ilmahaaga ugu badbaadi karto fasas/hurgun.



Buugani-yar waa laga soo degsan/daabacan kara isagoo nooca PDF ah, booqo bogga internetka www.rsvirus.se, kaddib jagsii halka ereyga (Broschyr) u ku qoran yahay.

AbbVie AB, Box 1523, 171 29 Solna | www.rsvirus.se